



**Warbixinta Waxqabadka  
Hay'adda Waddooyinka Puntland**

**Rubaca 1aad (Jan-Feb) 2025**

*10th Jan 2026  
Office of the CEO  
Puntland Highway Authority*

## Contents

1.Hordhac .....	3
2. Waxqabadka maamulka iyo maaliyadda .....	4
2.1 Shirweynaha 1aad Ee horumarinta waddooyinka Puntland .....	4
2.2 Daabicista warbixintii Shirweynihii 1aad ee horumarinta waddooyinka Puntland .....	4
3. Waxqabadka awoodsiinta hay'adda ee dhinaca farsamada dhismaha sahanka iyo shaybaarka ..	5
3.1 Daraasadaha Hay'adda PHA ee shirweynaha horumarinta waddooyinka Puntland .....	5
3.1.1 Hagaajinta Tayada waddooyinka iyo hubintooda .....	5
3.1.3 Horumarinta agabka iyo farsamooyinka nashqadaynta waddooyinka .....	5
3.1.4 Warbixinta xaaladda waddooyinka Puntland .....	6
3.2 tabobarka tijaabada Tayada ciidda iyo shubka .....	6
4. Waxqabadka dayactirka waddooyinka waaweyn iyo yareynta shilalka .....	7
4.1 Dib u dhiska waddada wadnaha Gaalkacyo .....	7
4.2 dhagax dhigga waddada Makka-AL-Mukarrama ee Boosaaso .....	7
4.3 dhismaha iyo dayactirka jidka Dalcadda Kalaale .....	7
4.4 dhismaha Dalcadda Kalaale ee deegaanka Gargoore .....	8
4.5 dhismaha buundooyinka Boosaaso - Laasadawaco .....	8
4.6 dayactirka waddada Jid – La helay ee Degmada Ufayn .....	8
4.7 mashruuca dayactirka dhuumo biyoodyada Xaaji Khayr .....	9
4.8 mashruuca dib u dhiska waddada Ooman - Kalabayr .....	9
4.9 dhagax dhigga dhismaha waddooyinka Boosaaso .....	9
5. Waxqabadka maamulka, kormeerka iyo dabogalka mashaariicda horumarinta waddooyinka ...	10
5.1 Kormeerka mashruuca dib u dhiska buundooyinka yar yar ee Boosaaso-Laaso-Dawaco. ....	10
5.2 Kormeerka mashruuca Xaaji Khayr .....	10
5.3 Kormeerka dhismaha waddada Ooman – Kalabayr.....	10
.....	11
6. Waxqabadka xoojinta xiriirada kala duwan ee Hay'adda PHA .....	11
6.1 Xiriirka Hay'adda ee Dowladda Puntland .....	11
6.1.1 Furitaanka shirweynaha Horumarinta waddooyinka Puntland.....	11
6.1.2 Kormeerka wasaaradda Howlaha Guud iyo PHA ee waddada Birta Dheer Illaa Kalabayr ...	11
6.2 Xiriirka Hay'adda PHA iyo Hay'adaha Caalamiga ah .....	12
6.3 Xiriirka Hay'adda ee Dadweynaha.....	12

## 1.Hordhac

Warbixinta waxqabadka hay'adda ee saddexda bilood ee ugu horreysa sannadka 2025 ka waa warbixin soo koobaysa waxqabadkii iyo guulihii ay hay'addu ka gaartay shaqooyinkii qorsheysnaa saddexda bilood ee lasoo dhaafay ee kala ah (Jannaayo, Febraayo Iyo March), iyo sidoo kale shaqooyinkii aan ku jirin qorshaha balse lagu guuleystay in la qabto.

Warbixintan ayaa ku salaysan qorsheyaasha waxqabad ee hay'adda sannadka 2025 sidoo kalena ku jaan go'an ujeeddooyinka Hay'adda ee horumarinta awoodda maamulka, dayactirka jidadka iyo yareynta shilalka, kormeerka mashaariicda dhismaha waddooyinka iyo sidoo kale xoojinta xiriirka ay hay'addu la leedahay Dowladda, hay'ada caalamiga iyo dadweynaha.

### UJEEDDOOYINKA HAY'ADDA SANNADKA 2025

1. Horumarinta Awoodda Maamulka iyo Maaliyadda Hay'adda.
2. Horumarinta Awoodda Hay'adda ee Farsamada dhismaha iyo sahanka waddooyinka.
3. Dib u dhiska, dayactirka iyo horumarinta jidadka laamiga weyn.
4. Maamulka, kormeerka iyo dabagalka Mashaariicda dayactirka ee horumarinta Jidadka.
5. In la xoojiyo Xiriirka Hay'adda PHA ay la lahayd Hay'adda Caalamiga iyo deeq bixiyaasha , Dowladda iyo dadweynaha, lana dhiso sumcadda Hay'adda.

## 2. Waxqabadka maamulka iyo maaliyadda

### 2.1 Shirweynaha 1aad Ee horumarinta waddooyinka Puntland


9kii Janaayo, Hay'adda waddooyinka Puntland PHA ayaa markii u horreysay qabatay shirweynaha 1aad ee Horumarinta waddooyinka Puntland, shirkan oo noociisa ahaa kii kowaad ee ka dhaca Soomaaliya ayaa waxaa lagu casumay madaxda Dowladda Puntland, Hay'adaha caalamiga ah, Aqoonyahan iyo kuburro kala duwan oo ka timid daafaha caalamka. Shirka oo socday saddex maalmood ayaa lagusoo bandhigay daraasado iyo dood cilmiyeedyo ku saabsan horumarinta waddooyinka Puntland.



### 2.2 Daabicista warbixintii Shirweynihii 1aad ee horumarinta waddooyinka Puntland.

17kii March, Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland waxa ay si rasmi ah u daabacday Warbixinta Shirweynihii horumarinta Waddooyinka Puntland ee qabsoomay Bishii January 2025.

Warbixinta oo ka koobnayd 71 bog ayaa si waafi ah u bidhaamisay waxyaabihii kasoo baxay shirka intii uu socday iyo shaqooyinkii ku dhex jirey ee cilmi baarista iyo soo jeedinta isugu jirey.



### 3. Waxqabadka awoodsiinta hay'adda ee dhinaca farsamada dhismaha sahanka iyo shaybaarka

#### 3.1 Daraasadaha Hay'adda PHA ee shirweynaha horumarinta waddooyinka Puntland

Hay'adda waddooyinka Puntland oo qabatay shirweynihii 1aad ee horumarinta waddooyinka Puntland ayaa ku soo bandhigtay daraasado iyo warbixinno kala duwan oo la xiriira horumarinta waddooyinka Puntland, taas oo muujisay awoodda iyo karaanka howlwadeennada Hay'adda ee horumarinta waddooyinka Puntland.

##### 3.1.1 Hagaajinta Tayada waddooyinka iyo hubintooda

11kii Janaury, Agaasimaha waaxada Ilaalinta tayada & hormarinta waddooyinka ee HaY'adda Waddooyinka DPL Eng. Bashir Saed A. Guure ayaa ku soo bandhigay shirweynaha 1aad ee hormarinta waddooyinka Puntland daraasad ku saabsan hagaajinta tayada waddooyinka Puntland iyo hubintooda, si loo helo waddooyin hagaagsan.



##### 3.1.2 Caqabadaha hortaagan nidaamka xakamaynta xamuulka gaadiidka Puntland

11kii Janaury, Eng. Mohamud Farah oo ka mid ah howlwadeennada Hay'adda Waddooyinka Puntland (PHA) ayaa ku soo bandhigay shirweynaha 1aad ee hormarinta waddooyinka Puntland daraasad ku saabsan caqabadaha hortaagan hirgelinta nidaamka xakamaynta xamuulka gaadiidka Puntland.



##### 3.1.3 Horumarinta agabka iyo farsamooyinka nashqadaynta waddooyinka

11kii Janaury, Eng. Abdikadir Mohamed (Sadik) oo ah Injinneer ka tirsan Hay'adda Waddooyinka Puntland (PHA) ayaa ku soo bandhigay shirweynaha 1aad ee hormarinta waddooyinka Puntland daraasad ku saabsan horumarinta Agabka iyo Farsamooyinka Naqshadaynta Waddooyinka iyo sahmintooda.



### 3.1.4 Warbixinta xaaladda waddooyinka Puntland

10kii jannaury, Eng. Maxamuud Daahir Siciid, Agaasimaha waaxda Dhismaha iyo Dayactirka Hay'adda Waddooyinka Puntland ayaa ku soo bandhigay shirweynaha 1aad ee hormarinta waddooyinka Puntland Warbixinta daraasad ku saabsan xaaladda waddooyinka Puntland oo ay samaysay Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland (PHA).



### 3.2 tabobarka tijaabada Tayada ciidda iyo shubka

Tabobarka tijaabada Tayada ciidda iyo shubka ayaa loo qabtay ardayda jaamacadda Bariga Afrika ee Boosaaso. Tabobarkan oo ahaa mid aad u muhiim ahaa ayaa waxaa bixiyey Eng. Bashir Guure, ayaa ardayda lagu baray qayb ka mid ah tijaaboyinka lagu ogaado tayada ciidda iyo shubka, waxaana ka mid ahaa:

- Modified Proctor Test.
- Concrete Compressive Test.
- Dynamic Cone Penotrometer (DCP).
- Rebound Hammer Test.



## 4. Waxqabadka dayactirka waddooyinka waaweyn iyo yareynta shilalka

### 4.1 Dib u dhiska waddada wadnaha Gaalkacyo

Waxa dib u dhis ballaaran lagu sameeyey Waddada Halbawlaha ah Ee dhexmarta Magaalada oo dhererkeedu yahay 1000m(1KM) ballaceeduna yahay 8m. waddada waxaa dhisay Shirkada Kebarco iyadoo Hay'adda waddooyinka Puntland ay lahayd kormeerka iyo hubinta Tayada waddada.



### 4.2 dhagax dhigga waddada Makka-AL-Mukarrama ee Boosaaso

2 dii Febaury, Gudoomiyaha Hay'adda Waddooyinka Puntland Dr.Abdifitah Sugule ayaa kaqaybgalay Munaasabadda dhagax dhigga waddada Makka-Al-Mukarrama ee magaalada Bosaso oo laga dhigi doono jid laami ah oo cabbirkiisu yahay 2.36km. Waana qayb kamid ah mashruuca horumarinta waddooyinka Boosaso oo la qorsheeyay in 32 waddo lafuro lana dhiso.



### 4.3 dhismaha iyo dayactirka jidka Dalcadda Kalaale

Hay'adda Waddooyinka Puntland oo kaashanaysa WFP ayaa dib u dhis ku samaysay jidka Dalcadda Kalaale masaafo dhan 600m. Dalcadda ayaa kamid ah goobaha ugu khatarta badan ee ay ku safraan dadka Puntland. Dib u dhiska lagu sameeyay Dalcadda ayaa wax weyn ka baddali doona isu socodka gaadiidka iyo dadweynaha ee Gobollada Bari Iyo Raascaseyr.



#### **4.4 dhismaha Dalcadda Kalaale ee deegaanka Gargoore**

Hay'adda Waddooyinka Puntland waxaa ay bilawday Dhismaha Dalacada Kalaale ee Deegaanka Gargoore, masafo dhan 600 oo mitir oo ah waddo Shub ah. Mashruucan oo fulintiisa ay iska kaashanayaan Hay'adda WFP iyo Hay'adda Waddooyinka Puntland.



#### **4.5 dhismaha buundooyinka Boosaaso - Laasadawaco**

Mashruuca dhismaha Buundooyinka boosaaso-laasodawaco oo kamid ah mashaariicda dib u dhiska Jidadka Puntland ee ay maalgalinayso Dowladda Puntland ayaa si wanaagsan u socda iyada oo la jaray 20 Dhuumo Biyood (culverts), kuwaasoo la dhameeyey dhammaan shubkooda waxaana dhamaantood la dhigay biyo-mareenadii cusbaa ee shubka ahaa, waxaana 6 ka mid ah la dhammeeyey buuxintooda(backfilling)



#### **4.6 dayactirka waddada Jid – La helay ee Degmada Ufayn**

4tii Febraayo, Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland ayaa bilowday dayactirka Waddada Jid-lahelay oo ah marin muhiim u ah isku xirka degmada Ufeyn iyo deegaano ku yaalla dusha sare ee buuraha Calmiskaad ee gobolka Bari. Wadadan ayaa kamid ahayd goobaha aan gaadiidku ku safri karin, dadweynuhu ay ku qabeen dhibaato xoog leh. Waxaana Hay'adda PHA oo kaashanaysa WFP ay ka shaqaysay masafo dhan 12KM.



#### **4.7 mashruuca dayactirka dhuumo biyoodyada Xaaji Khayr**

Waxaa 15kii Febraayo si guul ah kusoo dhammaaday mashruucii lagu dayactirayay dhuumo Biyoodyada (box culverts) iyo buunda jiifta laga dhisaayay (Xaji khayr ) Waxaana loo Fasaxay Gaadiidka si ay u maraan. Shacabka ayaa uga mahadceliyay Dowladda Puntland oo ugu horreeyo Madaxweyne Siciid Cabdullaahi Deni Iyo Hay'adda waddooyinka Puntland. Mashruucan waxaa fuliyay Shirkadda AL Baashid.



#### **4.8 mashruuca dib u dhiska waddada Ooman - Kalabayr**

Waxa meel wanaagsan maraya mashruuca dib-u-dhiska waddada halbawlaaha ah iskuna xirta Garoowe-Gaalkacyo oo maraysa Ooman – Kalabayr, Mushruucan oo ahaa 20km oo kamid ah waddada ayaa so gaaray 9.5km oo Ladamaystiray. Diversion Roadka oo ahaa 21Km oo kamid ah waddo leexadka ayaa soo gaaray 16km oo la dhamaystiray.



#### **4.9 dhagax dhigga dhismaha waddooyinka Boosaaso**

Gudoomiyaha Hay'adda Waddooyin Puntland Dr. Abdifitah Sugule ayaa ka qayb galay dhagax dhigga dhismaha waddooyinka Bosaso oo la rabo in 32 waddo lafuro lana dhiso.

Wajaga kowaad oo 29kii Jannaayo la daahfuray waxaa la dhisyaa 5.3km oo ah labo waddo, Waddada Ex Bosaso ( Dacwa) iyo Waddada Makka-Al Mukarrama. Dhismaha Waddooyinka Waxaa iska kaashanaya Dowladda Hoose Bosaso iyo Dowladda dhexe, gaar ahaan Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Hay'adda Waddooyinka Puntland iyo Guddiga Ceeldaahir.



## 5. Waxqabadka maamulka, kormeerka iyo dabogalka mashaariicda horumarinta waddooyinka

### 5.1 Kormeerka mashruuca dib u dhiska buundooyinka yar yar ee Boosaaso-Laaso-Dawaco.

18kii March, Guddoomiyaha Hay'adda Waddooyinka Puntland Dr Abdifitah Mohamed Sugulle Ayaa Kormeer Shaqo ku tagey Mashruuca Dib udhiska Buundooyinka yaryar (Culverts) ee Boosaaso-Laasodawaco oo kamid ah mashaariicda dib u dhiska Jidadka Puntland ee ay maalgalinayso Dowladda Puntland.



### 5.2 Kormeerka mashruuca Xaaji Khayr

2dii March, Gudoomiye Ku xigeenka Hay'adda Waddooyinka Puntland Abdirisak Mohamed Hayir Iyo qaybo ka mid ah Injinneerada hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland ayaa kormeer ku tegay Xaaji-khayr.

Mashruucan oo ah Dhismaha Buundo jiif, Dhismaha Biyo Mareen Afar Qolley ah, Dib u dhiska carrotuurkii iyo dhuumo biyood yadii dhaawacu soo gaaray.



### 5.3 Kormeerka dhismaha waddada Ooman – Kalabayr

10 kii Febraayo, Injinneerada tayo dhowrka hay'adda waddooyinka Dawladda Puntland (PHA) ayaa kormeer ku tegay goobta Ooman-Kalabayr oo ay ka socota shaqada dib u dhiska waddada. Injinneerada Shaybaarka ayaa shaqo tayo hubin ah ka sameeyay masaafo dhan 3km waxaana laga qaaday labo Test oo kala ah: FDT iyo DCB. Mashruucan oo ay kormeerayso hay'adda PHA, waxaa maalgalinaysa Dowladda Puntland, waxaana fulinaysa shirkadda KEBARCO.



## 6. Waxqabadka xoojinta xiriirada kala duwan ee Hay'adda PHA

Xoojinta xiriirka Hay'adda Waddooyinka Puntland ee ay la leedahay hay'adaha caalamiga ah iyo deeq bixiyaasha, Dowladda iyo dadweynaha wuxuu ka mid yahay ujeedooyinka aasaaska u ah gaarista himilooyinka Hay'adda ee horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha ee Puntland.

### 6.1 Xiriirka Hay'adda ee Dowladda Puntland

Hay'adda waddooyinka DPL, waxay xoojisay xiriirka kala dhaxeeya hay'addaha kala duwan ee dawladda Puntland oo ay ka dhaxeeyso wada shaqaynta ku aaddan horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha ee Puntland, iyagoo si fiican warbixinadda iyo xogaha u kala qaata.

#### 6.1.1 Furitaanka shirweynaha Horumarinta waddooyinka Puntland.

9kii January, Madaxweyne Ku-xigeenka Dowladda Puntland Mudane H.E Ilyas Osman Lugatoor ayaa furay Shirweynaha horumarinta Waddooyinka Puntland, oo ah kii koowaad ee noociisa ah, Shirkan oo socday saddex maalmood, waxaa soo diyaarisay Hay'adda Waddooyinka Puntland iyadoo ay kala qeybgashay Wasaaradda Howlaha Guud.



#### 6.1.2 Kormeerka wasaaradda Howlaha Guud iyo PHA ee waddada Birta Dheer Illaa Kalabayr

Wasiirka Howlaha guud, Gaadiidka iyo Guryaynta Puntland Faraax Cawad Jaamac oo ay weheliyaan Guddoomiyaha Hay'adda waddooyinka Dawladda Puntland Abdifitah Maxamed Sugulle, Madaxa shirkadda Keberco Faysal Xasan Yacquub iyo Ganacsase Jaamac dhagadheere, ayaa kormeer ku tagay dhismaha wadada laamiga ah ee Birta-dheer iyo Kalabarayr oo la dhamaystiray 8.5 KM, lana gaarsiiyay Ooman.



## **6.2 Xiriirka Hay'adda PHA iyo Hay'adaha Caalamiga ah**

Hay'adda Waddooyinka Puntland waxaa muhiim u ah xoojinta xiriirka Hay'adaha caalamiga iyo deeqbixiyaasha Caalamka ee ay wada shaqayntu kala dhaxayso, si ujeeddadaas loo hirgeliyana

waxaa ay Hay'addu kulamo lagu xoojinayo xiriirka Hay'adaha Caalamiga ah si joogto ah kula qaadataa xafiiska Hay'adda, sidoo Kalena waxa ay qayb ka ahayd kulammo Hay'adaha caalamiga ah si guud ula yeeshaan hay'adaha kala duwan ee Dowladda Puntland.

## **6.3 Xiriirka Hay'adda ee Dadweynaha**

Hay'adda Waddooyinka Puntland PHA waxa ay mudnaan siisay xiriirka la leedahay dadweynaha Puntland, waxaana ay Hay'addu si joogto ah warbixinnada shaqooyinka ay dadka u hayso ay u la wadaagtaa bulshada iyada oo u marinaysa website ka hay'adda ee <https://pha.pl.so> iyo boggaga ay ku leedahay warbaahinta casriga ah sida Facebook Iyo Twitter.

Hay'addu Waxa ay sidoo kale ka qayb noqotaa madallada looga hadlayo horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha gaar ahaan waddooyinka si ay u gaarto aragtida bulshada taas oo fududeysay helidda baahiyaha degdegga ah ee bulshadu u qabaan isla markaas Hay'addu ku howlgasho ka jawaabistooda.